



Ciqaab

✎ Adelheid Marie Bwire

✉ Melany Pietersen

💬 Abdi Muse

💬 somaliska

📊 nivå 2






Maalin maalmaha ka mid ah, hooyo waxay heshay miro badan.



“Goormaa wax miro ah heleynaa?” ayaan weydiinay. “Waxaan miraha cuni doonaa caawa,” ayay tiri hooyo.




Walaalkay Rahim waa mid dhuuni ah. Waxa uu dhadhamiyaa midhaha oo dhan. In badan na waa uu ka cunaa.



“Bal eeg waxuu Rahim sameeyey!” Waxaa ku qayliyay walaalkayga yar. “Rahim waa akhlaaq la aan iyo bakhayl,” Ayaan dhahaa.



Hooyo waxay u caraysantahy Rahim.



Waxaan sidoo kale u caraysannahay Rahim.
Laakin Rahim kama xumo.



“Miyaadan u soconin in aad ciqaabto Rahim?”
ayuu waydiiyay walaalkayga yar.



“Rahim, dhakhso waad kashalaayi doontaa,”
hooyo ayaa ugu digtay.



Rahim ayaa billaabay inuu dareemo xanuun.



“Caloosha ayaa aad i xanuunayso,” ayuu
Rahim ku gunuunacay.



Hooyo ayaa garanaysay in ay taas dhacayso.
Mirtii ayaa ciqaabeyso Rahim!



Ogu danbeytii, Rahim ayaa nagu yidhi waan ka xumahay. "Marnaba markale ma noqon doono mid saaid dhuuni u ah," ayuu balanqaaday, waana aaminnay dhammaanteen isaga.



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Ciqaab

Skriven av: Adelheid Marie Bwire

Illustrerad av: Melany Pietersen

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons
[Erkännande 3.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).